NSW Health

Jadeeco

Warqada xaqiiqda

Measles - Fact sheet

Somali

Xaqiiqaha muhiimka ah

- Jadeecadu waa jiro lays qaadsiiyo oo aad u faafa keenana xumad iyo finnan.
- Jadeecada waxay keeni kartaa dhibaatooyin daran oo ay ku jiraan namooniya iyo encephalitis oo aad u baahan kartid isbitaal dhigid.
- Tallaalku waa sida ugu wanaagsan ee looga hortago jirada iyo fiditaanka jadeecada. Jadeecada waa ku dhif Australia gudaheeda sababtoo ah tallaalku waa wax ku ool ka hortegaya cudurka.
- Tallaalka jadeecadu wuxuu baaqi ku ahaanayaa inuu yahay muhiim sababtoo ah dadku waxay dib u soo celin karaan fayraska ka dib markay dibeda ka soo noqdaan.
- Jadeecadu waxay weli caadi ka tahay dalal badan oo ay Awstareeliyaanku ay fasax ahaan u booqdaan ama inay soo arkaan saaxiibo iyo qoysba.
- Haddii ay kula tahay inaad qabto jadeeco, hore u wac dhakhtarkaaga si ay u xiddidaan soo gaaristeeda dadka kale markaad timaadid.

Waa maxay jadeecadu?

Jadeecadu waa cudur sis are lays qaadsiiyo si aad ahna u faafa oo keeni kara dhibaato daran. Wuxuu weli yahay wax u keena dhimasho carruurta ka yar 5 ta sanno qaybo yar oo ka mid ah aduunka.

Waayadii hore, caabuqa jadeecadu wuxuu caam ku ahaa da'da carruurnimada Australia dhexdeeda. Badi dadka dhashay ka hor 1966 carruur ahaantoodii way ku dhacday jadeecadu waxayna u egtahay inay difaac ka heystaan.

Tallaalku waa mahadsan yahay jadeecadu hadda waa dhif Australia dhexdeeda.

Si kastaba ha ahaatee, jadeecada waxay weli ka tahay caam qaybo badan oo aduunka ka mid ah, waxaana sii soconaya inay ka dilaacdo tiro dalal ah. Dadka u safraya dibeda ama imanaya Australia ayaa soo qaadi kara cudurka, oo keenaya inay jadeecadu ku faafto bulshada. Tani waa sababta ay muhiimka u tahay inaad hubisid in lagaa tallaalay jadeecada si aad u caawisid ilaalinta nafsadaada iyo ta bulshadaba.

Waa muhiim in la hubiyo in qofkasta oo dhashay intii lagu jiray ama ka dib 1966 oo uu qaatay laba qiyaasood oo ah tallaalada jadeecada.

© NSW Ministry of Health. SHPN (CDB) 250443-15. March 2026

Waa maxay astaamaha jadeecadu?

Astaamaha koowaad waa xumad, daal, qufac, sanka oo dareere ka socdo, indho cas oo ku xannuunanaya iyo xannuun aad dareento. Maalmo yar ka dib finnan ayaa soo baxa. Finnanku waxay ku bilaamaan wajiga, wuxuu ku faafaa jirka wuxuuna socdaa ilaa 4-7 maalmood. Finankaasi ma aha kuwa cuncun leh. Dadka qaarkii, gaar ahaan carruurta yar yar, waxaa sidoo kale laga yaabaa shuban inay yeeshaan.

Astaamaha jadeecadu badanaa waxay bilaamaan 10 maalmood ka dib marka lagu qaadsiiyo fayraska laakiinse marmarka qaarkood waxay qaadataa waxa u yar sida toddoba ama inta u badan oo ah 18 maalmood inay soo muuqato. Finnankaan badanaa waxay soo muuqdaan qiyaastii 14 maalmood ka dib marka lagu qaadsiiyo fayraska jadeecada.

Jadeecadu waa cudur daran. Ilaa saddex maalmood dadka qaba jadeecada waxay leeyihiin dhibaatooyin kuwo badan oo ka mid ahina waxay u baahdaan isbitaal in la dhigo. Dhibaadooyinka jadeecada waxaa ka mid ah caabuqa dhegaha, shuban, iyo burunkiitada ama qabowga. Qiyaastii hal 1000 kii qofba ee qaba jadeeco wuxuu qaadaa encephalitis (maskax barar).

Sidee loo faafiyaa jadeecada?

Jadeecada waxaa badanaa loo faafiyaa marka qof uu u neefsado fayraska jadeecada ee uu ku qufacay ama ku hindhisay hawada qof caabuqsan.

Jadeecadu waa mid ka mid ah caabuqyada bani'aadamka ee sida ugu sahlan u faafa. Haddii aad isku qol ku jirtaan qof qaba jadeeco wuxuu keeni karaa inaad qaado caabuqa.

Dadka qaba jadeecada badanaa caabuqa waxay yeeshaan ka hor intaan astaamuhu bilaaban ilaa afar maalmood ka dib marka finnanku ay bilaamaan.

Yaa khatar ugu jira inay qaadaan jadeeco?

Dadku khatar ay ugu jiraan qaadista jadeecada haddii:

- aysan weligood qaadin caabuqa jadeeca **ama**
- aysan qaadan laba qiyaas oo ka kooban tallaalka jadeecada **ama**
- ay leeyihiin habka difaaca jirka oo daciifay (tus. dadka qaadanaya kiimotherabiga ama radyotherabiga kansarka ama dadka qaata qiyaas sare oo ah daawooyinka istaroodka) xataa haddii ay tallaal buuxa qaateen ama ay hore u qaadeen caabuqa jadeeca **iyo**
- ay la kulmeen qof qaba caabuqa jadeecada.

Jadeecadu waxay ku badan tahay dalal badan badanaana waxaa dhaca faafitaan aad u balaaran. Dadka dibeda u safra waxay khatar ugu jiraan jadeeco haddii aan difaacoodu fiiceyn.

Sidee baa looga hortegi karaa jadeecada?

Tallaal

Iska Ilaalinta ugu wanaagsan ee jadeecada waa in lays tallaalo. Laba qiyaasood oo tallaalka jadeecada ah (oo ugu yaraan afar toddobaad isu jira) waxay ku siineysaa wakhti dheer, waana suurtagal inay noqoto noloshaada oo dhan, ilaalinta boqolkiiba 99 dadka tallaalan.

Dadka qorsheynaya inay dibada aadaan waa inay kala hadlaan GP-gooda ama farmashiilaha wax ku saabsan tallaalka, jeegaree in talloolkoodu uu dhan yahay, oo ay hubiyaan inay si buuxda uga tallaalan yihiin jadeecada ka hor intaysan ka bixin Australia.

Australia gudaheeda, laba qiyaasood oo ah tallaalka jadeecada ayaa la siinayaa carruurta si waafaqsan Barnaamijka Tallaalka Qaranka (NIP) bilaash ahaan:

- tallaalka da'da 12 bilood ee jadeecada ee qaamow qashiirka-busbuska rubella (MMR)
- Tallaalka da'da 18 bilood ee jadeecada ee qaamow qashiirka busbuska rubella (MMRV).

Tallaaladaan waxay bixiyaan ilaalinta qaamow qashiirka, jadeecada Jarmalka (rubella), iyo busbuska (varicella) iyo sidoo kale jadeecada.

Dadka qorsheynaya inay dibeda la aadaan carruur u dhaxeysa da'da 6 iyo 18 bilood waa inay kala hadlaan qorshahooda dhakhtarkooda GP-ga, maadaama carruurta tegaysa goobaha jadeecada khatarta sare leh waxay u qaadan karaan tallaalka hore.

Qof kasta oo dhashay intii lagu jiray ama 1966 ka dib oo uusan weligood ku dhicin caabuqa jadeecada waa inay arkaan dhakhtarkooda si ay u hubiyaan inay qaateen laba qiyaasood oo ah tallaalka jadeecada ugu yaraan isu jira afar toddobaad. Haddii aysan saas ahayn, tallaalku waa bilaash NSW.

Waa ammaan inaad qaadato tallaalka laba jeer wax ka badan, saa daraadeed dadka aan hubin waa inay istallaalaan.

Tallaalka jadeecada waxaa laga heli karaa NSW dhexdeeda dhakhaatiirta guud iyo farmashiiyada diiwaangashan ee tallaalka bixiya.

Farmashiiyada tallaalka bixiya ma awoodaan inay siiyaan tallaalka jadeecada carruurta ka yar da'da 5 sanno ah.

Qofkii aan haysan caddeynta labada qiyaasood ee tallaalka jadeecada (ee aan tallaal u doonan sida waafaqasan NIP) tallaalka nafsadiisu waa bilaash, si kastaba ha ahaatee farmashiilaha ama dhakhtarka waxaa laga yaabaa inay kugu dalacaan khidmada adeega si ay u maamulaan tallaalka.

Wixii macluumaad dheeraad ah eeg Measles Vaccination FAQs.

Iska ilaali dadka kale haddii aad astaamaha leedahay

Dadka leh astaamaha jadeecada waa inay hore u wacaan markay tagayaan xarumaha daryeelka caafimaadka (sida waaxda gargaarka deg dega ah ama GP), si ay u wargeliyaan astaamahooda shaqaalaha, si loo karantiino markay yimaadaan oo loo xaddido inay jadeecadu mustaqbalka ku faafto dadka kale.

Dadka qaba jadeecada waa inay guriga joogaan ilaa caabuqa ka baxo (tus. ilaa afar maalmood ka dib marka finanku ay bilowdaan) si loo yareeyo khatarta ku faafitaanka dadka kale.

Si loo ogaadaa jadeecada?

Jadeecada waa laga shakiyaa marka qofku uu xannuunsado, qufaco, sanka duuf ka dareero ama indhuhu xannuunaan iyo xumad ay daba socdaan finan.

Mar kasta oo laga shakiyo jadeeco, saami sanka, cunnaha iyo kaadi waa in la qaadaa si loo xaqiijiyo ogaanshaha. Baaritaan dhiig ayaa sidoo kale la sameyn karaa.

Xaqiijinta ogaanshuhu waa muhiim maadaama ay ogolaanayso in si dhakhsaha caafimaadka dadweynaha kale loola socdo ee khatarta ugu jira qaadista jadeecada.

Sidee baa loo daaweeyaa jadeecada?

Ma jiro daaweyn khaas ah oo ay jadeecadu leedahay. Dadka qaba caabuqa jadeecada caadi ahaan waxaa lagula taliyaa inay nastaan, oo ay cabbaan dareero fara badan oo ay qaataan baarasatamool si ay u daaweeyaan xumada.

Dad badan waxaa laga yaabaa in jiradu ay noqoto mid daran oo u baahata in isbitaal la dhigo.

Waa maxay jawaabka caafimaadka dadweynaha ee jadeecada?

Dhakhaatiirta, isbitaalada iyo shaybaarada, dugsiga iyo xarumaha xannaanada carruurta waa inay soo wargeliyaan kiisaska jadeecada Unnuga Caafimaadka Dadweynaha ee degaanka.

Shaqaalaha Unnuga Caafimaadka Dadweynaha ayaa wareysan doona dhakhtarka iyo bukaanka (ama xannaaneeyaha) si ay u helaan sidii uu caabuqu u dhacay, ogaanshaha dad kale oo khatar ugu jira caabuqa, dhaqan geli tallaabooyin lagu xaddidayo (sida tallaalka iyo xaddeyanaha imaanshaha dugsiga ama shaqada), iyo bixinta tallooyin kale.

Dadka qaba jadeecada waa inay guriga joogaan oo aysan tegin shaqo, dugsi ama waxbarashada hore carruurnimada iyo adeegyada xannaanada ugu yaraan afar maalmood ka dib marka finnanku ay soo baxaan.

Jadeecada: Macluumaadka foomka xiriiradu wuxuu ka kooban yahay macluumaad muhiim ah oo loogu talagalay dhakhaatiirtu inay siiyaan xiriirada jadeecada, qiimeyna ay daba socoto iyo/ama bixinta ka hortag ka dib xiriir ka dib.

Wixii macluumaad dheeraad ah

Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan ka wac Unuggaaga Caafimaadka Dadweynaha ee xaafada 1300 066 055.

Haddii adiga, ama ilmahaagu, aad qabtaan astaamo jadeeco oo aad ka walaacsan tahay, la hadal dhakhtarkaaga isla markiiba, ama xaaladaha degdega ah wac 000. Wixii ah tallo caafimaad sidoo kale ka wac Healthdirect 1800 022 222 tallo caafimaad oo bilaash ah 24 saac ama la hadal farmashiilahaaga xaafada.

Macluumaad loogu talagalay xiriiradaada jadeecada

Waa maxay xiriirka jadeecadu?

Sababtoo ah jadeecadu waa mid aad u faafta, xiriirada dadka qaba caabuqa jadeecada ee aad hawa isku mid ah wadaagteen. Tan waxaa ku jiri kara inaad isku qol ku jirteen uun ama goobta sugitaanka qof qaba jadeeco.

Waa sahlan tahay inaan qaadid jadeecada adoon garan, sababtoo ah dadku waa faafiyaan ka hor intaan finanku soo bixin. Tani waa sababta ay muhiimka u tahay inaad hubisid inaad difaac ka leedahay jadeecada, gaar ahaan haddii aad qorsheynaysid inaad dibeda u safartid.

Maxaan sameeyaa haddii aan leeyahay xiriir jadeecada?

- Xiriirada jadeecada waa inay eegaan astaamaha jadeecada ilaa 18 maalmood ka dib xiriirkoodii ugu danbeeyey qof faafin karay jadeecada. Ka hortag ahaan waa faker fiican inaadan la kulmin qof khatar ugu jira jadeeecada inta wakhtigan lagu jiro, sida carruurta dhalatay ee aad ka u yar ee aan la tallaali karin.

Haddii aad bilowdid inaad yeelato astaamaha jadeecada:

- ha tegin goobaha dadweynaha sida shaqada, dugsiga, waxbarashada hore ama adeegyada xannaanada, ama xarumaha dukaameysiga, oo iska ilaali inaad isticmaasho gaaddiidka dadweynaha.
- Arag dhakhtar, iyadoo la door bidayo dhakhtarkaaga guud, sida ugu dhakhaha badan ee suurtagalka ah. Hore u wac si aad u wargelisid shaqaalaha astaamahaaga si ay u nidaamiyaan xaddida xiriirkaaga dadka kale ee goobta qaliinka jooga. Haddii laguu daaweeyey xiriir jadeeco ahaan qof leh, sii qaado ‘Foomka qiimeynta xiriirka jadeecada’.
- Ka wac Unugaaga Caafimaadka Dadweynaha ee degaanka (1300 066 055).